[Loogada Shirkada ama Hey'adda]

[Halkaan gali Magaca Shirkada ama Hey'adda]

Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah

Bisha Maalinta, Sanadka

AFEEF AMA XUSUUSIN

Foom Tusaaleedkaan ah Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah waxaa diyaariyay Xafiiska Maareynta Xaaladaha Degdegga ah ee Magaalada Boston si uu ganacsiyada uga caawiyo dhisidda nidaam dhamaystiran oo loogu talagalay u diyaar-garowga, ka fal-celinta, iyo ka soo kabashada musiibooyinka ku habsada ganacsiga. Dukumiintigaan beddel uma ahan, mana burinaayo sharciyada, xeerarka, hab-raacyada, ama shuruudaha Hay'adda Badbaadada iyo Badqabka Shaqaalaha (OSHA) ee khuseeya ganacsigaaga ama xaruntaada. Qorshahaan beddel uma ahan shuruucda degmada, gobolka, ama federaalka, ama habraacyada loogu talagalay nooca ganacsigaaga. Waa in lala isticmaalaa dhammaan shuruudaha sharci iyo xeerarka ee lagu dabaqi karo.

Foom Tusaaleedkaan waxa ku jira qaybaha aasaasiga ah ee qorshe hawleedka xaaladaha degdegga ah. Si kastaba ha ahaatee, ganacsiyadda waa inay si taxaddar leh dib-u-eegis ugu sameeyaan dhammaan shuruudaha khuseeya oo ay u habeeyaan foom tusaaleedka si uu ula jaanqaado hawlahooda, nidaamyadooda, iyo baahiyahooda gaarka ah. Wax ka beddelis ka baxsan kuwa la soo jeediyay ee ku jira [ ] ayaa laga yaabaa inaad u baahato si aad u sameyso barnaamij wax ku ool ah oo gaar u ah ganacsigaaga.

TUSMO

1. QORSHE HAWLEEDKA XAALADAHA DEGDEGGA AH 3
DARDARGALINTA QORSHAHA 3
HABRAACYADA WADA-XIRIIRKA 4
NIDAAMYADA DIGNIINTA IYO OGEYSIINTA 4
FARIIMAHA DIGNIINTA IYO OGEYSIINTA 5
QORSHAHA DAD SOO BADBAADINTA 6
MEELEYNTA DADKA 7
Habraacyada Rabshadaha Goobta Shaqada 9
ILAALINTA HANTIDA IYO QALABKA 11
2. HAGEYAASHA KA FAL-CELINTA XAALADAHA DEGDEGGA AH 12
DABKA 12
QORSHAHA XAALADAHA DEGDEGA AH EE CAAFIMAAD 14
HALISTAQARAXA AMA BAMBADA 17
WAXYAALO LAGA SHAKIYAY (XIRMO/WARQAD) 18
JEERMISYADA DHIIGGA LAGU KALA QAADO 19
KORONTO GO'IS 21
SHIDAAL/KIIMIKO MEEL KU DAADATA 22
FURASHADA GAASKA DABIICIGA AH MISE BOROBAYN 25
TUUBO BIYO OO JABTAY 26
CIMILADA OO AAD U XUN 27
DAAD 31
DIB-U-HELIDDA WAXYAALAHA DAADKU SAAMEEYAY 33

WASAKHOWGA BADEECADA 35
QABOOJIYE AMA KULULEEYE HALAABAY/CUNTO XUMAATAY 36
WASAKHOWGA BIYAHA/AMARKA KARKARINTA BIYAHA ISTICMAALKA KAHOR 40
DHACA 41
KACDOON BULSHO/SHACAB 42
WEERARADA INTARNEETKA (SAYBAR-ATAAK) 43

1. QORSHE HAWLEEDKA XAALADAHA DEGDEGGA AH

Qorshe Hawleedka Xaaladaha Degdegga ah ayaa wuxuu shirkadda ka hagayaa ka-falcelinta xaaladaha degdegga ah ee kala duwan sida shil caafimaad, dab, fatahaad, khatar argagixisonimo ee markaa taagan, iwm. Xaaladahaan markii ay yimaadaan waxaa lagama maarmaan noqon karta in dadka lasoo badbaadiyo, in dadkii la meeleeyo, la badbaadiyo hantida iyo qalabka, iyo in la qaado tallaabooyin kale si looga hortago dhaawac, dhimasho, ama waxyeello hantiyeed.

DARDARGALINTA QORSHAHA

Wixii la xiriira xaaladaha degdega ah oo waxyeeleynaya dadka, xoolaha iyo hantida, shaqaaluhu waa iney wacaan 9-1-1. Haddii ay carqalad ku timaado ganacsi, [Maamulka Ansixinta] ayaa lala soo socodsiinayaa si loo dardargeliyo qorshaha. Iyadoo loo fiirinaayo ahdaafta qorshahaan, carqalad ganacsi waxa lagu qeexaa sidaan:

1. carqalad ama khatar weyn oo saameysa hawlaha ganacsiga; ama
2. xaalad kedis ama degdeg ah ee soo socota oo la filayo in ay saameyn ku yeelato ganacsiga.
3. [Halkaan soo gali waxyaalo kale oo sababi kara in qorshaha la dhaqan galiyo ee khuseeya ganacsiga]

HABRAACYADA WADA-XIRIIRKA

Isticmaal tilmaamaha iyo nidaamyada hoos ku xusan si aad u xaqiijiso wada-xiriir wax ku oolka leh inta lagu guda jiro xaalad degdeg ah ama carqalad ku timaada hawlahaaga ganacsi. Si aad u hesho taageero ama macluumaad dheeri ah, fiiri haddii ay jiraan kuwo laga heli karo Barnaamijyada Horumarinta Ganacsiyada Xaafadaha & Urur Xaafadeedka Ganacsiyada Taageera. Wixii faahfaahin dheeri ah, eeg Lifaaq F – Hageyaasha/Macluumaadka ku jira Foom Tusaaleedka Qorshaha Sii-wadista Ganacsiga.

OGAANSHAHA IYO SOO GUDBINTA DHACDOOYINKA

- **Soo Gudbinta Xaaladaha Degdegga ah:** Isla markiiba wac 9-1-1 hadii ay xaalad degdeg ah timaado sida dabka, shilalka caafimaad, ama xaaladaha khatarta ku ah nolosha. Xaqiiji in si dhaqso ah loo wargeliyo ka-fal-celiyayaasha ama qolada gurmadka ee xaalada degdegga ah. Eeg Lifaaq F – Hageyaasha/Macluumaadka si aad u ogaato iney jiraan hageyaal/taageero dheeri ah.

- **Ogeysii Shaqaalaha:** La socodsii shaqaalaha wixii carqalado ama xaalado degdeg ah ee soo kordha, inta lagu guda jiro saacadaha shaqada iyo kadibba. Tani waxaa ka mid ah waxyaalaha

kasoo kordha xaaladda shaqada, tallaabooyinka xiga, iyo tilmaamaha badqabka. Nidaamyada Digniinta iyo Ogeysiinta waxaa laga heli karaa hoos,

- **Xaaladaha Degdegga ah ee Aan Horay Loo Aqoon:** Hadii ay soo gudboonaadaan arimaha sida carqaladaha IT-ga, dhibaatooyinka silsilada/isu-socodka hawlaha ganacsi, ama shilal ka dhaca agagaarkiina, la socodsii xubnaha kooxdaada, maamulayaasha, iyo daneeyayaasha ay khuseyso si la isugu dubarido dadaalada ka fal-celinta.

NIDAAMYADA DIGNIINTA IYO OGEYSIINTA

Isticmaal nidaamyada hoos ku xusan si aad dadka ula wadaagto talaabooyinka badbaadada (tusaale, ka-bixitaanka goobta, meeleynta dadka, xiritaanka goobta) iyo si aad shaqaalaha iyo daneeyayaasha u siiso wararka muhiimka ah ee soo kordha:

	Siistamka	**Goobta/Kontorool Baanelka ama Meesha Laga Galo**
Nidaamka Digniinta	Alaarmiga Dabka	
	Qalabka Ogeysiinta Dadweynaha	
	Mid kale (Sheeg waxa uu yahay)	
Nidaamka Ogeysiinta	Elektaroonik	
	Shabakada wicitaanka taleefanka	
	Gacanka/raadiyaha gacanta	
	Mid kale (Sheeg waxa uu yahay)	

Kormeer siistamyadaan si aad u xaqiijiso in wada-xiriirka uu yahay mid nadiif ah, sax ah, isla markaana

waqtigeeda ku timaadda gudaha iyo dibaddaba intii lagu guda jiro carqaladadaha, xaaladaha degdegga ah, iyo guud ahaan habka dib-usoo-kabashada.

FARIIMAHA DIGNIINTA IYO OGEYSIINTA

Isticmaal foom tusaaleedka hoose si aad u xaqiijiso soo gudbinta wararkii ugu dambeeyay ee xaalada degdeg ah oo cad joogtana ah. Isticmaal nidaamyada digniinta iyo ogeysiinta ee kor lagu faahfaahiyey si aad usoo gudbiso fariimaha hoos ku qoran.

> Ogeysiis dhammaan shaqaalaha iyo macaamiisha, fadlan ogow kani waa digniin xaalad degdeg ah.
>
> [Nooca Xaalada Degdegga ah] ayaa lasoo warinayaa iney ka dhacday [Goobta]. SI aad uga badbaado, sida ugu dhaqsiyaha badan [Halkaan soo gali Tallaabada Ku Habboon: Ka Baxa Dhismaha, Meeshaas Ku Nagaada ama Taga, iwm.].
>
> [Halkaan Soo Gali Wixii Tilmaamo Dheeri ah].
>
> Qolada gurmadka xaaladaha degdegga ah ayaa soo socda. Raac dhammaan tilmaamaha shaqaalaha oo tag [Goobta Badbaadada Loo Qoondeeyey]. Degganaan muuji, dadka kalena caawi haddii ay caawimaad baahdaan.

QORSHAHA DAD SOO BADBAADINTA

Haddii ay dhacdo in alaarmiga xaaladaha degdeg ah aad maqasho ama la bixiyo amar ah in meesha laga baxo, shaqaalaha waa inay isla markiiba ka baxaan dhismaha iyagoo ka baxaya iridaha ugu dhow ee lagu muujiyey qorshaha waddada baxsiga ee hoose.

1. **Shaqaalaha ama macaamiisha baahiyaha gaarka ah qaba**waxay kula kulmi doonaan kaaliyeyaashooda loo qoondeeyay [Aagga Caawimaada Badbaadinta ee gudaha dhismaha] si ay uga caawiyaan inay si nabad ah uga baxaan ama looga saaro dhismaha.

2. **U tilmaam macaamiisha ama dadka kale ee meesha soo booqday** irida ugu dhow ee laga baxo markii ay yimaadaan xaaladaha degdegga ah.

3. **Xir dhamaan albaabada** kadib markii aad ka baxdo, adigoo aanan ka qufuleynin shaqaalaha gurmadka.

4. **isugu imaada goobta isu-imaatinka loo qoondeeyay** oo ku taala [Goobta Isu-imaatinka ee dhismaha ka baxsan]. Maamulayaashu waxay hubin doonaan tirada shaqaalahooda waxayna ogeysiin doonaan [Qofka Mas'uulka ah] kaasoo fiirin doona liiska shaqaalaha iyo diiwaanka booqdayaasha si loo xaqiijiyo in qof walba la tiriyay. Dadka maqan waa in isla markiiba lala

socodsiiyaa qolada gurmadka xaaladaha degdegga ah.

5. **Qof loo oggolyahay ma jirto inuu dib ugu soo noqdo dhismaha** kadib bixitaanka ilaa ay oggolaadaan kooxaha gurmadka degdegga ah. Dhammaan shaqaalala waa inay ku sugnaadaan goobta isu-imaatinka ilaa booliiska xaqiijiyaan in ay ammaan tahay in lagu soo noqdo ama ay bixiyaan tilmaamo dheeraad ah oo ku saabsan ka bixitaanka goobta.

Halkaan Soo Gali Khariirad Muujineysa Wadooyin Lagu Baxsado Markii ay Xaalad Degdega ah Soo Gudboonaato

MEELEYNTA DADKA

Xaaladaha degdegga ah qaarkood, sida cimilada daran, walxo halis ah oo daatay, ama rabshadaha bulshada, waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqto in dadka meel amaan ah la geeyo. Heerka meeleynta dadka ayaa lagu dhawaaqi doonaa iyada oo loo marayo Nidaamyada Digniinta iyo Ogeysiiska ee horey loo soo sheegay.

Mas'uuliyadaha	Magaca/Meesha Lagala Xiriiri Karo	Goobta
Hoggaamiyaha Kooxda		
La soco cimilada iyo wararka si aad u ogaato tilmaamihii ugu		

dambeeyay oo dadka gaarsii digniinaha		
U sheeg shaqaalaha ku sugan bannaanka inay gudaha dhismaha soo galaan		
U rar shaqaalaha meelaha dhismaha dhexdiisa ah oo ka fog daaqadaha & albaabada (haddii ay suurtagal tahay dabaqa ka sarreeya kan koowaad)		
Dammi siistamka hawo-qaadayaasha oo xir meelaha ay hawada kasoo gasho		
Maamulida siistamka hawo-qaadayaasha		
Maareynta qalabka hawada, qolalka marwaaxadaha, ama meelaha ay hawada kasoo gasho		

Hab-raaca Meeleynta Dadka

1. **U sheeg shaqaalaha iney gudaha galaan. Ilaali oo xir goobta ganacsiga.**
2. **Sug Amaanka Dhismaha**:
    - Xir oo quful dhamaan daaqadaha, albaabada, hawo-mareennada, daahyada, oo dami nalalka haddii loo baahdo.
    - Dammi qalabka/siistamyada kuleylka, hawo-qaadayaasha, iyo mukeyfyada si looga hortago in hawada banaanka ah ay soo gasho. Meelaha laga helaayo qalabka/siistamyada waxaa laga heli karaa jadwalka kor ku xusan.
3. **Goobta Magangelyada Loo Qoondeeyay**:
    - Tag [Goobta Magangelyada Loo Qoondeeyay] (waa qol gudaha ku yaala oo aan laheyn

wax daaqado ah ama in yar, sida qolka waxa lagu keydiyo ah ama kan shirarka).
  - Xaqiiji in qolka ay gali karaan oo uu ku filan yahay dhammaan shaqaalaha iyo macaamiisha joogi karta.

4. **La Socodsii Waxa Socda Xiriirada Xaaladaha Degdegga ah:** Shaqaalaha iyo macaamiishu waa inay la xiriiraan xiriiradooda xaaladaha degdegga ah si ay ugu sheegaan meesha ay joogaan uguna xaqiijiyaan inay nabad qabaan, haddii aanay ka imaaneynin wax dhibaato ah.

5. **Agabka Badbaadada:** Xaqiiji goobta magangalyada loogu talagalay ay ku diyaarsanyihiin agabka xaaladaha degdegga ah, kuwaas oo lagu kaydiyo [Goobta Loo Qoondeeyay], oo ay ka mid yihiin:

  - Sanduuqa qalabka gargaarka caaafimaad ee degdegga ah
  - Tooshash iyo batariyaal
  - Liiska Dadka Lala Xiriiraayo Markii ay timaado Xaalad Degdegga ah
  - Raadiye ku shaqeeya batari
  - Biyo iyo cuntooyinka fudfud ee aan halaaweynin

6. **Wada-xriirka/Isgaarsiinta**: Isticmaal raadiyaha batariga ku shaqeeya ama telefoon si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay. La xiriir mas'uuliyiinta deegaanka oo si joogto ah shaqaalaha ula wadaag wixii soo kordha.

7. **Ku Sugnoow Goobta Amaanka ah ee Gudaha Dhismaha**: Ha ka tagin goobta magangelyada loo qoondeeyay ilaa aad ogeysiis rasmi ah ka hesho shaqaalaha gurmadka xaaladaha degdega ah oo ay xaqiijiyaan in ay ammaan tahay in laga baxo goobta.

Kadib Dhacdada

- Markii amarka ah in lagu sugnaado goobta megangelyada la qaado, qolada gurmadka xaaladaha degdega ah ama madaxda deegaanka ayaa soo sheegi doona in ay amaan tahay in goobta laga soo baxo.
- Shaqaalaha waa in ay raacaan tilmaamaha ku saabsan in ay ku noqdaan goobaha shaqada ama ka baxaan dhismaha haddii xaaladdu weli khatar tahay.

Habraacyada Rabshadaha Goobta Shaqada

Haddii ay rabshad ka dhacdo goobta shaqada, waa in tallaabo degdeg ah la qaadaa si loo xaqiijiyo dhammaan badqabka dadka ku sugan goobta:

1. **Aqoonso Khataraha**: Is daji oo qiimee xaaladda. Haddii aanay wax dhib ah kaaga imaaneynin, wac ama farriin u dir 911.
2. **Sug Amaanka Goobta:**

   a. Quful albaabada, xir daaqadaha, oo dami nalalka.
   b. Isticmaal alaab culus ama waxyaabo kale oo markaa la heli karo si aad ugu aadiso albaabada iyo meelaha laga soo gali karo.
3. **Aamusnaaw oo Isqari:**
   a. Codka ka xir taleefanda iyo aaladaha kale.
   b. Ka fogow daaqadaha iyo albaabada si aan lagaaga arkin.
   c. Ha sameynin wax dhawaaq intii karaankaaga ah si aadan dhib isugu soo jiidin.
4. **Soo Gudbi Xaalada Hadii Aanay Wax Dhib ah Kaaga Imaaneynin:**
   a. Isticmaal fariin qoraal ama hababka kale oo aan dhawaaq laheyn si aad hay'adaha amniga ula socdsiisid sida ay wax u jiraan.
   b. Haddii aad meel ku xannibantahay ama aadan ka bixi karin meel markaas amman ah, u sheeg meesha aad joogto qolada gurmadka.
5. **Raac Tilmaamaha Laamaha Amniga:** Markii ay laamaha amniga yimaadaan, si sax ah u raac tilmaamaha ay bixinayaan.
   a. Hala arko gacmahaaga oo iska ilaali inaad sameyso dhaqdhaqaaq kedis ah.

Kadib Dhacdada

- Haka tagin goobta magangalyada ilaa ay laamaha amniga ama qolada gargaarka degdega ah ka xaqiijiyaan in ammaan tahay in laga soo baxo.
- Hubi badqabka dhammaan shaqaalaha iyo macaamiisha. Sii dadka gargaar caafimaad ee dagdaga ah haddii loo baahdo.
- La shaqee mas'uuliyiinta inta ay ku jiraan baaritaankooda oo xaqiiji inay sameeyaan dabagalka ku habboon, sida la-talin ama taageero loo fidinaayo dadka ay dhibaatadu saameysay.

ILAALINTA HANTIDA IYO QALABKA

Haddii ay dhacdo in dadkii ay ka baxaan ama laga saaro dhismaha, waxaa laga maarmaan noqon karta in la badbaadiyo qaar ka mid ah alaabta si loo yareeyo khatarta ku wajahan dhismaha iyo shaqaalaha (tusaale ahaan, badbaadinta dukumiintiyada xasaasiga ah ah ama kuwa qiimaha leh, ama daminta qalabka si looga hortago iney daataan ama furmaan walxaha khatarta ah). Waa in la qaadaa tallaabooyinkaan hoos ku xusan si loo badbaadiyo hantida iyo qalabka:

- Aqoonso waxyaalaha u baahan in la badbaadiyo.
- Diiwaangeli meesha uu yaalo qalab kasta.
- Bixi tilmaamo lagu badbaadinaayo hantida ama qalabka.
- Qiyaas waqtiga loo baahan yahay si loo dhammeystiro badbaadinta alaabta iyo qalabka.

Hantida iyo Qalabka	Meesha Hantida iyo Qalabka uu yaalo	Tilmaamaha Lagu Badbaadinaayo Hantida iyo Qalabka	Qiyaasta Waqtiga ay Qaadan Karto in lasoo Badbaadiyo

Qof walba oo mas'uul ka ah badbaadinta siistamyada ama adeegyada muhiimka ah sida korontada waa inuu awood u yeeshaa inuu qiimeeyo marka aysan ammaan ahayn in hawsha wax badbaadinta la sii wado. Markii hantida ama qalabka lagama maarmaanka ah la la badbaadiyo, ama haddii khatarta xaaladda ay kasii darto, shaqaalaha waa inay isla markiiba ka baxaan dhismaha iyagoo isticmaalaya jidka baxsashada ugu dhow oo ay isugu yimaadaan goobta loo asteeyay isu-imaatinka.

2. HAGEYAASHA KA FAL-CELINTA XAALADAHA DEGDEGGA AH

DABKA

Haddii lasoo sheego inuu dab kacay, daar alaarmiga dabka adigoo jiidaya (haddii uu jiro oo aan horay loo daarin) si aad dadka meesha kuga jira uga digto inay ka baxaan dhismaha. Kadibna wac 911 si loola wadaago Waaxda Dab-damiska. Bixi macluumaadkaan hoos ku xusan:

- Magaca iyo cinwaanka ganacsiga/shirkadda
- Nooca dabka (tusaale: koronto, saliid karkartay, warqad/xaanshiyo, kiimiko)
- Goobta uu dabka ka kacay (dhismaha iyo dabaqa)
- Nooca alaarmiga dabka (tusaale: dareemaha qiiqa ee otomaatig ah, badhan la taabanaayo ama la jiidaayo, siistamka biyo rusheeyaha)
- Meesha uu yaalo ama ku dhagan yahay alaarmiga dabka (tusaale: dhismaha iyo dabaqa)
- Magaca qofka soo sheegay inuu dab kacay
- Telefoon nambarka loogu soo celin karo hadii faahfaahin dheeri ah loo baahdo
- Kooxda dad badbaadinta si ay u hagaan shaqaalaha iyo dadka kale ee meesha jooga

Habraacyada

1. **Dad Ka-saarista Goobta:** Ka saar dadka dhismaha ku jira adigoo isticmaalaya waddooyinka dad saarista una sheegaya iney tagaan goobta isu-imaatinka ah ee bannaanka.
2. **Hag Dadka**: Ku hag dadka iney isticmaalaan jaranjarooyinka iyo meelaha kale ee laga baxo si ay uga fogaadaan meesha dabka.
3. **Mamnuuc:** Ha u ogolaanin dadka iney isticmaalaan wiishashaka.
4. **Tirakoob Dhamaan Shaqaalaha:** Ku tiri dhammaan shaqaalaha iyo dadka kale ee ku jiray dhismaha goobta isku-imaatinka.
5. **La Shaqee Waaxda Dab-damis**: U sheeg waaxda dab-damiska haddii qof walba la tiriyey iyo haddii ay dhaawacyo jiraan. Sii warbixin ku saabsan xaaladda degdegga ah, meesha ay wax marayaan iyo tallaabooyinka la qaaday. Sii khariidadda/khariidaha dhismaha, furayaasha iyo caawimaad kasta oo ay codsadaan.

Meelaha ay Yaalaan Qalabka Dab-damiska

Goobta

SIISTAMYADA XAKAMEYNTA & DAMINTA DABKA

Tix siistamyada xakameynta & daminta dabka oo ay kamid yihiin nooca siistamka, goobta, aagga ama khatarta la xakameynaayo, iyo tilmaamaha. Haddii aadan hubin, la xiriir masuulka ama milkiilaha dhismaha.

Nooca Siistamka	Goobta	Meesha Laga Helaayo / Tilmaamaha
Siistamka Biyaha Rusheeya	Qalabka Xakameeya Biyaha	
	Qalabka Xakameeya Biyaha	
	Qalabka Xakameeya Biyaha	
Matoorka Dab-damiska		
Siistamyada Dab-daminta Gaarka ah		

Halkaan soo geli Khariidadda Qalabka iyo Siistamyada Dab Daminta

QORSHAHA XAALADAHA DEGDEGA AH EE CAAFIMAAD

1. **Wac Qolyaha Adeegyada Xaaladaha Degdega ah ee Caafimaad**: Isla markiiba wac 911 oo u sheeg macluumaadka hoos ku xusan:
    - Tirada dadka ay wacyeelada soo gaartay
    - Meesha/meelaha saxda ah ee loogu tagi karo dadka ay waxyeelada soo gaartay
    - Waxyaalaha khatarta ah ee meesha ka jira
    - Macluumaadka ka caawinaya inay meesha galaan iyo meesha ay ka geli karaan shaqaalaha gargaarka degdega

2. **Bixi Gargaarka Degdega ah ee Caafimaad**:Haddii aad awoodo, caawi dadka oo sii gargaarka degdega ah kuwa dhaawacmay. Liiska shaqaalaha u tababaran iyo agabka gargaarka degdega ah ayaa hoos ku xusan.
3. **Hag Shaqaalaha Gargaarka Degdega ah:** Haddii aanay wax dhib ah kaaga imaaneynin, xaqiiji in qof uu banaanka ugu tago qolyaha adeegyada xaaladaha degdega ah ee caafimaad uuna ku hago meesha/meelaha loogu tagi karo dadka ay waxyeelada soo gaartay.

Tababarka Caafimaad ee ay Shaqaaluhu Qaateen

Tababbark	Magaca
Gargaarka Degdega ah	[Halkaan Soo Gali Magaca]

Habka Neefsiinta Wadnaha & Sanbabda (CRP)	
Isticmaalka Mashiinka Xakamaynta Gaaraca Wadnaha ee Otomaatiga ah (AED)	

Hagaha Meesha Laga Helaayo Qalabka Caafimaadka

Nooca Qalabka Caafimaad	Goobta
Mashiinka Xakamaynta Gaaraca Wadnaha ee Otomaatiga ah (AED)	[Halkaan soo Gali Meesha uu Yaalo]
Sanduuqa Qalabka Gargaarka Caaafimaad ee Degdegga ah	
Boorsada Qalabka Dhiigjoojinta	

Goobaha Ganacsi ee Magaalada Boston oo ay u yaalaan Mashiinka/Mashiinada Xakamaynta Gaaraca Wadnaha ee Otomaatiga ah (AED) waa iney usoo gudbiyaan Waaxda Adeegyada Gargaarka Degdega ah ee Caafimaad goobta/goobaha saxda ah ee ay yaalaan, iyagoo buuxinaya Foomka Soo Gudbinta Meesha uu Yaalo Mashiinka AED. Macluumaadkaan wuxuu caawin karaa goob-joogayaasha iyo Waaxda Adeegyada Gargaarka Degdega ah ee Caafimaad (EMS) inta lagu guda jiro xaalada degdega ah.

Halkaan Soo Gali Khariirad Muujineysa Meelaha laga Helaayo Qalabka Cafimaad

HALISTA QARAXA AMA BAMBADA

Si deggan oo dhaqsi uga falceli halista qaraxa ama bambada adigoo raacaya tilmaamahaan:

1. Wac nambarka gaaban ee 911**.**
2. Isticmaal foomamka warbixinta dhacdada oo qor dhammaan macluumaadka.
3. Dami qalabka elektaroonigga ah ee hoos ku xusan (sida):

a. Siistamka qalabka fariimaha gaagaaban ee shaqada
b. Siistamka Ogeysiiska Xaaladaha Degdegga ah (tusaale, siistamka ogeysiinta balaaran, siistamyada ogeysiinta dadweynaha, siistamyada ogeysiiska farriimaha xaaladaha degdegga ah)
c. Gacanka/raadiyayaasha gacanta
d. Taleefannada gacanta
e. Siistamyada Muujadaha Raadiyaha

4. Wac lambarada laga xiriiro shaqaalaha gurmadka haddii ay kuu saamaxayso.

FIIRO GAAR AH:

Raadinta waxaa lala samayn doonaa waaxda booliiska. Ha bilaabin raadinta adiga keligaa. Waxaa laga yaabaa in laamaha amniga ay kaa codsadaan inaad ka caawiso raadinta.

Isaga baxa dhismaha haddii:

- Wax looga shakiyay iney yihiin walxaha qaraxa laga dhex helo dhismaha.
- Laamaha amniga ay amraan in laga baxo goobta.
- Qarax ama bambo labaad ayaa lasoo sheegay inta lagu guda iro muddada uu cayimay soo-wacaha, baaritaankana ma dhamaanin.
- Amaanka shaqaalaha iyo dadka kale ee meesha jooga ay khatar ku jirto.

Eeg Qorshaha Bixitaanka ee kore.

WAXYAALO LAGA SHAKIYAY (XIRMO/WARQAD)

Ha urinin, ha taabanin, oo ha dhaqaajinin waxyaabaha laga shakiyay (xirmo/warqad).

Waxba haka beddelin sida ay tahay goobta, xitaa ha daminin nalalka.

Qiimee haddii ay jiro khatar cad oo toos ah, halis qarsoon oo aan toos aheyn, ama wax khatar ku ah dadka ama bey'adda.
Hanjabaad lagu soo diray telefoon, boosto, iwm. oo muujineysa in si ula kac ah meel loo dhigay wax halis ah gudaha dhismaha ama/iyo alaab.

Haddii aan la garan karin ilo wareedka saxda ah ee walxaha ama ay jirto xaalad hanjabaad oo khatar ah:

1. Wac nambarka gaaban ee 911.
2. Hadii aanay wax dhib ah kaaga imaaneynin, xir aagga ku xeeran walxaha laga shakiyay.
3. Isaga tag aagaas. Eeg Qorshaha Bixitaanka.
4. Qiimee heerka khatarta.
   a. Qor wixii macluumaad ah oo la xiriira waxa laga shakiyay.
   b. Hadii aanay wax dhib ah kaaga imaaneynin, baaritaan ku samee meesha macaquulka ah ee ay ka yimaadeen walxaha (burka, soodhaha la dubo, budada talcum, iwm.).
   c. Qor liiska dhamaan dadka, meelaha iyo alaabta ay walxahaas gaareen, oo la wadaag laamaha amniga.
5. Qiimee qofka/dadka laga yaabo iney taabteen walxahaas.
   a. Qof kasta oo looga shakiyo in uu taabtay ama ay soo gaareen walxahaas waa in meel gaar ah la geeyaa, oo laga fogeeyaa dadka kale.
   b. Raac tilmaamaha nadiifinta walxahaas oo ay bixinayaan waaxda adeegyada badbaadada dadweynaha ee meesha jooga.
6. Qiimee hadii ay daruuri tahay in walxahaas suuqa laga saaro loona sheego macaamiishii gadatay iney joojiyaan isticmaalkooda soona celiyaan.
7. Go'aan ka gaar macluumaadka aad la wadaageyso bulshada adigoo kaashanayo hey'adda badqabka dadweynaha.
8. La xiriir Khabiirka Arinkaan Loo Asteeyay/Qofka Loo Xilsaaray (magaca, jagadda uu hayo, iyo teleefan nambarka)
   a. ____
   b. ____
   c. ____

Haddii lagu qiimeeyo walxaha in aysan khatar ahayn:

1. Qaad talaabooyinka ku habboon si meesha looga saaro loona nadiifiyo aagga/badeecada.
2. La wadaag natiijooyinka macaamiisha iyo shaqaalaha laga yaabo in ay walxahaas

saameeyeen.

Qor dhammaan Dhhacdooyinka/Kharashaadka:
Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

JEERMISYADA DHIIGGA LAGU KALA QAADO

Dhacdooyinka Jeermisyada Dhiigga Lagu Kala Qaado:

Xaalad walba mise shil oo keeni kara in qof uu khatar ugu jiro inuu soo gaaro dhiig mise dhicaan ka yimid qofkale, la socodsii dhammaan waaxaha federaalka, gobolka iyo kuwa maxaliga ah wixii la xiriira jeermisyada dhiiigga lagu kala qaado (sida Xeerarka Jeermisyada Dhiigga Lagu kala Qaado OSHA, Xeerarka Federaalka ee ku xusan 29 CFR 1910.1030, iyo Xeerarka kale ee warshadaha ganacsiga)

Taxaddarada/Talaabooyin:

Raac taxaddarada guud mar walba oo aad la tacaalaysid dhacdooyinka la xiriira jeermisyada dhiigga lagu kala qaado:

- Ka soo qaad in dhammaan dhiigga iyo dhicaanada ka yimid jirka ay yihiin kuwo caabuq sidda, xiro walxaha lagu ilaaliyo badqabka shakhsiyeed (galoofis, ookiyaalo, iwm), isla markaana isticmaal "maaskarka caadiga ah" ee lagula tacaalo badqabka marka aad gurmad u fidinaysid qof haysa neef-qabatin.
- Kaliya shaqaalada u tababaran isticmaalidda walxaha lagu ilaaliyo badqabka shakhsiyeed ayaa gargar u fidin kara dhacdada.

Marka loo baahanyahay in la nadiifiyo dhiig mise walxaha kale ee ay suuraggalka tahay inay sidaan caabuq:

Habraacyada nadiifinta:

1. Had iyo jeer waa in la xirtaa galoofis. Xiro walxo kale ee lagu ilaaliyo badqabka adigoo u fiirinaya khatarta markaa taagan, tusaale xirishada dharka badqabka, maaskar, iyo/mise ookiyaalo.
2. Xakamay daadashada oo isla markiiba ku tirtir maro wax nuugta, shukumaan, mise budo nuugta walxaha dareeraha ah (haddii la heli karo; intaa kadib dhammaan walxahaas la isticmaalay waa in lagu ridaa meelaha lagu rido qashinka caabuq sidda).
3. Si fiican u nadiifi, adigoo isticmaalaya saabuun iyo biyo diirran.
4. Si fiican ugu buufi meesha ay wax so gareen maado jeermis-dile ah oo ka kooban 500–5000 ppm koloriin xor ah (1:100 ama 1:10 oo lagu khafiifiyaya jeermis-dile ka kooban koloriin 5%)
5. Qaad dhammaan walxaha wasakh soo gareen adigoo maanka ku haynaya inaadan gacanta ku qaadin

walxaha afaysan, sida dhalada. Isticmaal xaaqin, shayga lagu qaado carada mise qalab la mid ah kuwan si aad ogu qaado walxaha afaysan.

6. Ku tirtir aagga uu wasakh soo gaaray shukumaan lagu qoyey walxo jeermis-dile ah.
7. Ku rid dhammaan walxaha ay wasakh soo gareen mise wax lagu nadiifiyey qashan qubaha lagu rido Walxaha khatarta badan.
8. Walxaha afaysan waa in lagu ridaa weel aan daloolmin ka hor inta aan lagu ridin qashin-qubaha.
9. Nadiifi oo jeermiska ka dil qalab kasta mise walxaha kale ee aan qashinka lagu darin ee loo adeegsaday nadiifinta.
10. Iska bixi walxaha lagu ilaaliyo badqabka shakhsiyeed oo ku rid bacda lagu rido walxaha khatarta badan.
11. Duduub oo afka ka xir bacda cas kuna wareeji shakhsiga u xilsaaran.
12. Isla markiiba dhaq gacmahaaga adigoo isticmalaya sabuun.
13. Haddii hawsha nadiifinta ay tahay mid xad-dhaaf, haka waaban inaad la xiriirto shirkad madax-banaan.

Haddi ay ku soo gareen walxaha laga qaado jeermisyada dhiigga lagu kala qaado (tusaale inay cirbad ku mudday, indhaha mise afka in wax lagaga fardhiyay, inaad taabatay maqaar dhawacan):

1. Isla markiiba ku dhaq sabuun iyo biyo dhammaan qaybaha jirkaada ee ay wax so gareen.
2. Dhacdada la socodsii maamulka.
3. Raadso gargaar caafimaad oo la soco isbeddelladaada; tani waxay u baahan kartaa inaad la socotid xaaladdaada caafimaad mise inaad qaadatid daawooyin looga hortagayo caabuqyada dhiigga lagu kala qaado.
4. Ku qor warbixinta dhacdada.

KORONTO GO'IS

Haddii ay dhacdo in korontada tagto:

1. Tooshash sii dadka hadba intaad awoodid.
2. Indha-indhee dadyowga socotada ah mise shaqaalaha ee ku go'dooman dhamman goobaha suuraggalka ah in lagu xannibmo sida wiishashka.
3. Qiimee haddii aad u baahantahy inaad ka baxdo dhismaha (ka eeg Qorshaha Ka bixista).
4. Wac lambarada laga xiriiro shaqaalaha gurmadka haddii ay kuu saamaxayso.

Haddii koronta la'aanta ay samayso goobta dhismaha iyo meelaha ku xeeran bulshadaada:

- Weydii shirkadda korontada goorta ay rajaynayaan inay dib u soo celiyaan adeegyada korontada.
- Dami dhamman qalabka iyo hawo-kaydiyaasha ay waxyeello soo gaari karto marka ay korontadu soo laabato.
- Dabool dhamman walxaha dhakhsa khurma ee ku jira firinjeerka oo xir albaabka qaboojiyaasha/firinjeerada waawayn.

Haddi korontadu ay ka tagto xarumaha dhismahaaga oo kaliya:

- Ku samee indha-indhayn goobta si aad u ogaato sababaha muuqda ee keenay inay korontadu tagto.
- Dami dhamman qalabka iyo hawo-kaydiyaasha ay waxyeello soo gaari karto marka ay korontadu soo laabato.
- Dabool dhamman walxaha dhakhsa khurma ee ku jira firinjeerka oo xir albaabka qaboojiyaasha/firinjeerada waawayn.
- Wac shirkadda korontada ee deegaankaaga si dib ugu soo celiso adeegga korontada.

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadyada baxay:

Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

SHIDAAL/KIIMIKO MEEL KU DAADATA

Haddi uu shidaal daato: Shidaal

1. Qiimee khatarta la xiriirta shidaalka daatay.
2. Haddii shidaalka daatay aad ku qiimayso inuu yahay mid khatar ah, wac 911.
3. Raadi oo dami bamamka gaaska adigoo taabanaya badhanka daminta tooska ah.
4. Haddii aanay dhib kaga imaaneynin, xakamee daadashada isla markaana yaree inuu shidaalka meelo kale gaaro adigoo adeegsanaya bustooyin, barkimo iyo sigisaan loogu talagalay. Xir aagga uu ku daatay shidaalka si aad uga ilaaliso inuu meelo kale gaaro una jogtayso badqabka.
5. La xiriir Shirkaddaada Bixisa Adeegga Nadiifinta Walxaha Daatay si ay kaga caawiso tuurista/nadiifinta qashinka halista ah.
   a. Shirkadda Bixisa Adeegga Nadiifinta Walxaha Daatay ____
6. La xiriir Shirkadaada Hagaajisa Bamka Gaaska wixii la xiriiro adeeggyada dayactiraada.
   a. Shirkadda Hagaajisa Bamka Gaaska ____
7. La xiriir maamulka dukaanka.
8. Haddii shidaalka daatay uu soo gaaro aagga la xiriir:

   Waaxda Dab-demiska: adigoo ka wacaya **911**

   Booliska Bey'adda ee Magaalada Massachusetts (Massachusetts Environment Police, MEP) - (800) 632-8075

9. Had iyo jeer xiro Qalabka Lagu Mareeyo Badqabka Shakhsiyadeed (PPE) markaad nadiifinayso kiimikada daadatay.

Haddii ay Kiimiko Daadato: Saliid, Maadada lagu maareeyo heerkulka matoorka gaariga, Rinjiga, kimikada wax lagu dhaqo, iwm.

1. Isla markiiba xakamay maadada si aysan meelaha kale u gaarin.
2. Qiimee xadka daadashada, hawo mareennada u fur, xir goobta, oo ka fogay walxaha kicin kara dabka.
3. Nadiifi waxa daatay.
   a. Haddii daadashada ay adagtahay in la xakamayo, la xiriir hawl-wadeeno heegan u ah nadiifinta wasakhda halista ah.
   b. Xiro walxaha lagu ilaaliyo badqabka shakhsiyeed (galoofis, ookiyaal, bacda kabaha laga kor gashado).
   c. Wax ku tir dareeraha oo qalaji adigoo isticmaalaya qalajisada saliida mise walxo kale oo lagu nuugo dareerayaasha. Ka soo bilow nadiifinta cirifyada una soo wad kala bartamaha.
      i. **Maadooyinka Biyaha ku Qasma** (Rinjiga biya-biyaha ah, Maadada lagu maareeyo heerkulka matoorka gaariga, kiimikada wax lagu dhaqo, kiimikada guryaha)
      ii. **Kuwa Aashitada ah:** Waa in heer-dhexaad looga dhigaa Maadada wax lagu

khamiiriyo

iii. **Kuwa Saliidda ah** (Shidaalka banaanka lagu isticmaali karo rinjiga adag Madada lagu khafiifiyo/qaso rinjiga, Maadooyinka lagu nadiifiyo Gaaska/Shidaalka) *abadan ha u isticmaalin biyo inaad ku nadiifiso kiimiko saliid ka samaysan markay daadato, kaliya isticmaal walxaha qalajinta loo isticmaalo

4. Si taxaddar leh ugu rid weel la tuuri karo walxaha loo isticmaalay qalajinta (ku rid laba bacood oo isku dhex jiro ama adeegso baaldi dabool leh).

5. Tuur walxaha/badeecadaha gaaray kiimikada daadatay. Nadiifi meelaha walxaha daatay soo gareen iyo geesaha.

a. Tuur shayaha la soo xaaqay, agabyada wax lagu nadiifiyay, xaaqimaha, galoofisyada, bacaha kabaha laga kor gashado. Iska beddel dharka kuna dhaq sabuun.

Haddii ay si lama filaan ah wax kaga so garaan:

Indhaha: Biyo ku dhaq ilaa 15 daqiiqo. Isla markiiba raado gargaar caafimaad.

Maqaarka: Gabi ahaan ku dhaq sabuun iyo biyo. Eeg waraaqda ku dhagan weelka kiimikada si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah.

Dharka: Iska bixi dharka uu wasakha uu ka soo gaaray isla markana ku dhaq jirkaaga sabuun iyo biyo.

Eeg waraaqda ku dhagan weelka kiimikada si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah.

Haddii aad ka shakisantahay wax uu yahay shayga - isla markiiba raadso gargaar caafimaad.

FIIRO GAAR AH: Haddii aad raadsanyso gargaar caafimaad, horey ugu sii qaad weelka ku jirta kiimikada dhakhtarka.

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadyada baxay:

Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

FURASHADA GAASKA DABIICIGA AH MISE BOROBAYN

Xaaladda qiimee:

1. Haddii aad uriso gaas (urta ukun quruntay) mise aad maqasho sawaxanka gaas furmay, maanka ku haay in uu gaas furmay. Ha shidin daara-demiyaha, hana isticmaalin aaladaha elektarooniga ah, mise ha furin wax olol ah madaama ay dhalin karaan in gaaska uu dab kiciyo.
2. Iskaga tag aagga isla markiiba haddii gaaska furmay uu yahay mid halis ah mise kuu dhow. Iska caabin u fidi ku qaba baahiyaha gaarka ah sida socoshada iyo tacaamulka. Eeg Qorshaha Bixitaanka.
3. Wac nambarka gaaban ee 911.
4. Ku wargeli shaqaalaha, kiraystiyaasha, mise macaamiisha xaalada taagan oo la wadaag habraacyada badbaadada. Maanka ku haay inaad la socodsiiso shacabka haddii gaaska furmay ay kugu muuqato inuu dhalinaayo khatar wayn.
5. Raac hagitaanka ay bixiyeen kooxaha gurmadka degdega ah ee la xiriira dib ugu noqoshada goobta mise wixii tallaabooyin dheeraad ah.

Qaado Tallaabooyin Si aad u Xakamayso Faafitaankka (haddii aanay wax dhib aha kaga imaanaynin):

- Ka dami gaas qaybiyaha qaybta ugu wayn ee laga furo gaaska haddii aanay wax dhib ah kaga imaanaynin.
- Hawada u fur aagga adigoo balaqaayo albaabada iyo dariishadaha haddii aad banaanka ka joogtid aadna daremaysid badqab.
- U dig dadka aagga ka dhow kana hortagga waxyaabaha sababi kara inuu dab-kaco sida (sigaar cabis, shidista dab, mise isticmaalida aaladaha korontada ku shaqeeya).
- La xiriir shirkadda gaaska bixiso si aad ula socodsiiso gaas furashada.

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadyada baxay:

Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

TUUBO BIYO OO JABTAY

Haddii tubada biyaha jabto:

1. Qiimee haddii tuubbada ay tahay tan guriga mise midda dab-demiska.
   a. Bad tuubooyinka dabdemiska waxaa ku qoron/ku summadaysan "Fire Protection" mise "Sprinkler System" oo far casaan mise cadaan ah lagu qoray.
   b. Tuubbooyinka biyaha ee guriyaha waxaa ku qornaan kara "Portable Water" mise waxay lahaan karaan astaan buluug/cagaar ah.
2. Raadi isla markaana xir qaybta laga furo tuubada ee xakamaynayso isku xirka isha biyaha iyo halka ay ka burqanayaan.
3. La xiriir shirkaddaada biyaha si aad u heshid gargaar haddii ay kuu xiriirsantahay shirkadda biyaha ee degmada.
   - U gudbi faahfaahin kooban oo ka warbixinaysa nooca ay tahay tuubbada biyaha ee jabtay.
   - Ha iloowin inaad u sheegto haddii aad damisay qaybta tuubbada dabdemiska.
4. Ka xir korontada meesha ay dhibaatado soo gaartay adigoo ka daminaaya daara-demiyaha wayn isla markiiba, haddii aan wax kasoo gaaraynin. Ha gelin biyaha haddii qaybisada korontada, aaladaha ku shaqeeya korontada, ama fiilooyinka ay suuraggal ah inay biyuhu qariyeen.
5. Wac lambarada laga xiriiro shaqaalaha gurmadka haddii ay kuu saamaxayso.

Mar haddii la xiro qaybta ugu wayn ee biyaha lagu furo:

1. Biyaha ka qalaji aagga.
   a. Ka digtonow khatarta korontada.
2. Badeecada sagxad ka qaad oo saar meel sare si aad oga ilaaliso inay biyaha waxyeello u gaystaan.
3. Ka saar biyaha dhismaha mise qaybta biya mareen adigoo isticmaalaya iskoobe, xaaqiin, walxaha wax lagu xaaqo iyo qashin dhuuqiyasha.
4. La socodsii mulkiilaha dhismaha mise farsamayaqaanka korontadaada si uu u hubiyo/dib ugu soo celiyo korontada.

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadyada baxay:

Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

CIMILADA OO AAD U XUN

Haddii ay jirto cabsi laga qabo in la wajaho cimilo aad u xun:

1. La soco cimilada. (Ka eeg qaybta xigta faahfaahin ku aaadan cimila xumada)
2. La xiriir maamulka.
3. Qiimee goobaha badbaadada loo qoondeeyey ee dhismaha adigoo kaashanaya hor-jogayaasha iyo shaqaalaha. Goobaha badbaadada waa inay ahaadaan kuwa ku dhow darbiyada/tiirarka taageerada ee bartamaha ama dabarka dambe ee dhismaha, kana fog darbiyada muraayadaha ah, albaabada muraayadda ah iyo daaqadaha. Horay usoo qaado bacaha gurmadka degdegga ah markaa soo aadeysid meelahaas.

Goobta #1aad ee Badbaada:	
Goobta #2aad ee Badbaada:	

Hadii lasoo sheego in ay cimilo daran ka jirto meel u dhow dhismaha:

1. Saddex jeer ogeysiis ka dhex samee gudaha dhismaha. U sheeg macaamiisha iyo shaqaalaha inay ka fogaadaan daaqadaha oo ay tagaan bartamaha ama dabarka dambe ee dukaanka/xarunta ilaa laga soo sheego in khatartu dhammaatay.
2. Fiiri dhammaan qeybaha dhismaha si loo xaqiijiyo in qof walba uu tagay goobta isu-imaatinka loo qoondeeyay.

Fiiro gaar ah: Milkiilayaasha ganacsiga iyo shaqaalaha awood uma lahan iney meesha ku hayaan dadka meesha jooga ama shaqaalaha doonaya inay ka baxaan dhismaha inta lagu guda jiro cimilo daran ama duufaanta. Ha qufulin albaabada laga baxo.

Ilaali lacagta/badeecada haddii aysan khatar galinaynin qof naftiisa:

1. Xir oo quful dhammaan mashiinnada lacagta/kuwa kaashka.
2. Quful sanduuqa/xafiiska lacagta kaashka iyo albaabada xafiiska lacagta kaashka/kontoroolka.

Haddii ay jiraan waxyeelo soo gaartay hantida oo ka dhashay cimillada daran:

1. Ha gelin shaqaalaha ama dadka kale ee meesha jooga naftooda khatar. Ka tag oo u sheeg dadka kale ee meesha jooga iney ka baxaan dhismaha haddii ay jirto khatar soo socota (tusaale, furashada gaaska, fiilooyinka korontada oo soo dhacay, dhaawac dhismeed, iwm). Eeg Qorshaha Bixitaanka ee kore.
2. **Hadii aanay wax dhib ah idin kaga imaaneynin**, xaqiijiya inta ay la'eg tahay waxyeelada. Wac kormeeraha dhismooyinka ama shirkadda caymiskaaga si ay kaaga caawiyaan arrintan. Fiiriya:
   a. Waxyeelada saqafka
   b. Waxyeelada qaabdhismeedka

c. Khasaaraha badeecada/alaabta
3. Wac lambarada laga xiriiro shaqaalaha gurmadka haddii ay kuu saamaxayso.

Haddii saqafka ay biyo kasoo da’ayaan:

- Bac ku dabool badeecada, alaabta iyo qalabka.
- Dhig weelasha qashinka ee eberka ah meelaha biyuhu ka da’ayaan hoostooda.
- Badeecada sagxad ka qaad oo ugu yaraan haka sareeyaan in la'eg alwaaxa baaletka.
- Xarig ku xir si aan loosoo galin aagagga ay saameynta soo gaartay.

Hadii ay Biyo soo Galaan Dhismaha

Xaqiiji inaysan jirin khatar koronto iyo in aanu cuntada wasakhoobin. Ka saar biyaha dhismaha adigoo isticmaalaya iskoobe, xaaqin, walxaha wax lagu xaaqo iyo qashin dhuuqiyasha.

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadyada baxay:

Xaqiiji in qofka mas’uulka ka ah goobta uu warbixin ka qoro isla markana uu diiwaanka ku daro dhamman dhacdooyinka/kharashaadka baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

Sharaxaadda Cimilada Aadka u Xun

Sansaanta Duufaan Jilaal: Waxaa loola jedaa in ay suuraggal tahay inay dhacdo cimilo jilaal oo aad u xun isla markaana halis ah 48 saac gudaheeda.	**Sansaanta Duufaanta Wareegta:** Waa duufaano onkod daran wadata iyo duufaan wareegta oo macquul inay ka dhacdo aaggaga isha lagu haayo.
Digniin Duufaan Jilaal: Waa baraf culus oo cabbir ahaan gaari doono 6 inji muddo 12 saac ah, ugu yaraan 8 inji muddo 24 saac ah, mise ugu yaraan ½ inji oo baraf ayaa la filayaa inu isku-uruursamo.	**Digniinta Duufaanta Wareegta:** Duufaanta Wareegta ayaa bilaabmaysa mise socota. Isla markiiba raadso hoy.
Digniinta Qabow Daran: Waa dabayl in muddo ah soconaysa oo la rajaynaayo inay soo saarto daybal heerkulka qabowgeeda garaya ≤ −20°F mise ≤ −25°F (waxay ku xirantahay goobta) ugu yaraan 3 saacdood.	**Digniinta Kuleylka:** Waxaa la filayaa heerkul maalmeed gaaraya 95°F ilaa 99°F muddo laba saacadood ah ama ka badan oo soconaya laba maalmood oo isku xiga, ama 100°F ilaa 104°F muddo laba saacadood ah ama in ka badan hal maalin gudaheed.
Digniinta Duufaanta Barafka Wadata: Waxaa la filayaa dabaylo joogto ah ama marar badan ka dhacaya oo gaadhaya ugu yaraan 35 mayl saacaddii, oo wadata baraf xooggan oo da’aya ama bubuubaayo, taas oo yareynaysa in wax la arko	**Digniinta Fatahaada Xeebeed:** Waxaa la filayaa daadad xeebeed oo aad udaran oo waxyeello u geysan kara hanti khatarna gelin kara dadka naftooda.

in ka yar ¼ mayl muddo saddex saacadood ama ka badan. Duufaanta barafka wadata waa xaaladda ugu weyn ee cimilada muddadaas.	
Digniinta Fatahaada Degdeg ah: Waxaa la filayaa ama socda daad xoog leh oo si dhaqsi ah meelaha ku gaaraya oo biyo badan wata oo ku qulqulaya meel caadiyan qalalan, ama koror degdeg ah oo biyaha webiga ama kuwa meel tog ah gala ka badan heerka fatahaad ee horay loo sii cayimay.	**Digniinta Dabayl-biyo Xeebeed:** Waxaa la filayaa biyo badan oo khatar ku ah noolayaasha oo xeebta ka soo kacaya kuna qulqulaya dhulka, taas oo laga filayo aagga la cayimay, guud ahaan 36 saac gudahooda.
Sansaanta Duufaanta Kuleylka: Waxaa jiri kara khatar ka dhalata duufaan kuleyl wata dabaylo gaaraya 34 ilaa 63 kiilotan (39 ilaa 73 maul saacadii) ama ka badan**, guud ahaan waxa la filan karaa 48 saac gudahooda**. Dabaylahaan waxaa wehelin kara biyo xeebeed xoog leh, fatahaad xeebeed, iyo/ama fatahaad wabiyeed.	**Digniinta Duufaanta Kuleylka:** Waxaa la soo saaraa digniin marka la filayo dabaylo joogto ah oo gaadhaya 34 ilaa 63 kiilotan (39 ilaa 73 mayl saacadii) ama ka badan oo la socda duufaan kuleyl, **kuwaas oo dhici doona 36 saac gudahood ama ka yar.** Dabaylahaan waxaa wehelin kara biyo xeebeed xoog leh, fatahaad xeebeed, iyo/ama fatahaad wabiyeed.
Sansaanta Duufaan wadata Dabayl: Waxaa la soo saaraa marka duufaan kuleyl wata iyo dabaylo joogto ah oo gaaraya 74 mayl saacadii (64 kiilo not) ama ka badan ay khatar ku noqon karto xeeb ama dhul gudaha ah, guud ahaan 48 saac gudahood. Dabaylahaan waxaa wehelin kara biyo xeebeed xoog leh, fatahaad xeebeed, iyo/ama fatahaad wabiyeed. Sansaanta waxay tilmaameysaa suurtagalnimada xaalado duufaan, laakiin ma dammaanad qaadeyso inay dhici doonaan.	**Digniin Duufaan wadata Dabayl:** Daybaylo joogta ah oo leh xawaara garaaya 74 mph (64 knots) mise mid ka sareeysa oo weheliso duufaan wadata dabaylayaa la rajaynayaa inay saamayso aagga badda iyo berriga 36 saac gudahooda.

DAAD

Haddii ay jirto cabsi laga qabo in uu daad yimaado:

1. La soco cimilada.
2. Wac lambarada laga xiriiro shaqaalaha gurmadka haddii ay kuu saamaxayso.
3. U diyaar garoww inaad kor u qaaddo dhammaan alaabta, agabka qaaliga ah, qalabka farsamada, iyo kuwa elektarooniga ah ugu yaraan in ka sareysa 12-inji dhulka (waad isticmaali kartaan alwaaxa alaabta kor laga saaro).
4. Ogoow sida loo xiro ama loo damiyo adeegyada muhiimka ah sida korontada, gaaska iyo biyaha.

Digniin Daad: Waxaa suurto gal ah inuu daad yimaado. Dhageyso idaacadda NOAA. Isku diyaari inaad ka tagto goobta hadii ay qasan noqoto. La soco idaacadaha iyo telefishinnada ka shaqeeya goobta aad joobto si aad u hesho macluumaad dheeri ah.

Digniinta Daadka: Daad ayaa socda ama dhowaan imaan doona. Qaad talaabooyin isla markiiba. U diyaargaroow inaad tagto meel ka sareysa dhulka. Isla markiiba ka tag goobta hadii sidaa laguugla taliyo.

Hadii uu daad ka jiro meel u dhow dukaanka/xarunta:

1. Bilaw inaad bacaha ciid ku shubto si loo dhigo meelaha ay biyaha kasoo gali karaan.
2. Dib-u-eegis ku samee habraacyada wasakhowga biyaha.
3. Xaqiiji in dhammaan badeecada, alaabta qiimaha badan leh, iyo qalabka farsamada la saaro meel ka sareysa dhulka.
4. Ka dammi korontada meesha hadii laga damiyo ay iyada dhan baxeyso. Marka dukaanku diyaar u yahay in laga baxo, dammi Matoorka Koronto Dhaliyaha Degdega ah (haddii uu jiro). Xaqiiji in qalabka elektarooniga ah aysan ku xiriirsaneyn dabka si looga hortago iney qof qabsato korontada markii ay soo laabato.
5. Ilaali alaabta gacanta ee cunnada, qalabka, bustayaal, baakadaha, iyo alaabta hal-mar la isticmaalo si aysan u taaban ama wasakhoobin inta uu daadka socdo.

Ka bax oo ka saar dukaanka shaqaalaha iyo dadka kale ee meesha jooga haddii naftooda ay halis ku jirto, iyo/ama la idin ku amray inaad ka baxdaan goobta:

Eeg Qorshaha Bixitaanka ee kore.

Ilaali lacagta/badeecada haddii aysan khatar galinaynin qof naftiisa:

1. Xir oo quful dhammaan mashiinnada lacagta/kuwa kaashka.
2. Quful sanduuqa/xafiiska lacagta kaashka iyo albaabada xafiiska lacagta kaashka/kontoroolka.

Ka dib markii ay biyaha daadka guraan:

1. Qor waxyeelada jirta oo wac shirkaddaada caymiska si aad u warbixin ula wadaagto.

2. S taxaddar leh kusoo gala dukaanka. Xaqiiji in shaqaalala u tabbabaran xaaladaan ay si taxaddar leh kusoo galaan xarunta.
3. Qolyaha dayactirka ayaa xaqiijin doona iney shaqeyneyso korontada ka hor inta aan la shidin.
4. La xiriir waaxda dhismaha deegaanka iyo hay'adaha kale ee ay khuseeyo arintaan si loo qiimeeyo in dhismaha uu ammaan yahay oo la xaqiijiyo in la isticmaali karo.
5. Hala sameeyo nadiifin guud iyadoo la ilaalinaayo caafimaadka iyo badqabka shaqaalaha. Nadiifi oo jeermiska ka dil qalabka iyo alaabta cuntada.
6. Sida ugu dhakhsiyaha badan ugu kala sooca cuntooyinka, qalabka, alaabta cuntada, alaabta hal-mar la isticmaalo ee la badbaadin karo iyo kuwa aan la badbaadin karin.
7. Qashinka ku dar alaabta aan la badbaadin karin ama aan dib loo isticmaali karin adigoo iska ilaalinaya waxyeeladooda.

Talaabooyinka habraaca nadiifinta:

- Dhammaan qalabka cuntada, agabka, bustooyinka, iyo alaabta hal-mar la isticmaalo ee ay waxyeellada soo gaartay waa in la burburiyaa lana khashinka lagu daraa adigoo taxadaraaya.
- Dhulka, darbiyada, alaabta goobta sida roogaga, alaabta cuntada, iyo qalabka aan la badbaadin karin ama aan dib loo isticmaali karin waa in la tuuraa oo la beddelaa hadba sida haboon.
- Darbiyada, dhulka, iyo qalabka korkooda ee ay waxyeellada saameysay waa in lagu nadiifiyaa saabuun iyo biyo, oo biyo nadiif ah lagu raaciyaa, geermiskana laga dilaa. Roogagga waa in goobta laga saaraa ama lagu nadiifiyaa qalabka uumiga.
- Ka saar goobta waxyaalaha qooyan. Qashinka ku dar alaabta aan si fiican loo nadiifin karin oo aan jeermiska laga dili karin.
- Halaga saaro goobta biyaha meelaha fadhiya.
- Nadiifi oo jeermiska ka dil alaabta cuntada iyo qalabka ku jira goobta uu daadu saameeyay.
- Isticmaal kiimikooyinka wax lagu dhaqo sida oomada, iwm ah si aad u nadiifiso dhulka, qalabka, iyo meelaha kale ee uu daadku saameeyay, kadibna biyo nadiif ah ku raacsii.
- Jeermiska ka dil dhulka iyo meelaha kale ee uu daadu soo gaaray adigoo isticmaalaya biyo nadiif ah iyo kiimikada jeermiska disha (8 oz. oo kiimikada biliijka ah 5tii gallon oo biyo ah = 500 qeyb jalkii malyan ee kiimikada koloriinka).
- Kadibna qalaji aagga uu daadku saameeyay.
- Dhaq ama ka tuur madaxa tirtirayaasha iyo qalabka kale ee nadiifinta ee loo isticmaalay biyaha daadka.
- Tallaabo kale oo aad qaadi karto: Shaqaaleysii qolyaha adeegyada nadaafadeed oo khibrad u leh nadiifinta goobaha cunnada lagu iibiyo ama lagu sameeyo ee daadku saameeyay.
- Cunnada, Marooyinka, iyo Adeegyada / Alaabta Halka-mar la Isticmaalo ee Wasakhooway
- Ka takhalus dhammaan cunnada (kuwa xirmada ah ee meel ku jira ama kuwa aan xirineyn) ee ay soo gaareen biyaha daadka.
- Dhaq maro ama unifoom kasta oo ay soo gaareen biyaha daadka.
  - Si gooni ah u dhaq marooyinka kale.
  - Isticmaal kiimikada waxa lagu dhaqo ee baliij.
  - Isticmaal qalabka qalajiyaha dharka.

- Ka takhalus alaabta / adeegyada halka-mar la Isticmaalo ee ay soo gaareen biyaha daadka.

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadyada baxay:

Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

Si aad u hesho faahfaahin dheeri ah, **Booqo Ready.gov Business -** *Buuga Hagaha ee Daadka Gudaha ee FLASH*.

DIB-U-HELIDDA WAXYAALAHA DAADKU SAAMEEYAY

Qiimeynta Guud ee Dib-u-helidda Waxyaalaha Daadku Saameeyay:

Biyaha daadka waxay wataan dhiiqo, wasakhda bullaacadaha, saliid ama kiimikooyin khatar ah oo ka dhigi kara cuntooyinka waxyeelloobay kuwo aan la cuni karin haddii wixii ay ku jireen wasakhoobaan. Ka takhalus cunto kasta ama waxyaalaha cuntada lagu xiro ama la galiyo ee ay biyaha daadka soo gaareen. Cuntooyina iyo cabitaano aad u yar ayaa la badbaadin karaa markii ay taabtaan biyaha daadka. Cuntooyinka ku jira weelasha jilicsan sida baakadaha ama kuwa leh dabool la wareejin karo waa in la burburiyaa. Mararka qaar, waala badbaadin karaa waxyaalaha gasacadaysan ee ku jira gasacyada birta ah ama weelasha caaga ah ee adag. Si kastaba ha ahaatee, xaaladda gasaca laftiisa waa arrin kale oo sababeysa in qashinka lagu daro alaabta. Haddii gasaca uu miriray, ciid leeyahay, ama summadiisa ay ka uqday ama badbaadin karo oo dib looma isticmaali karo.

Biyaha daadka waxay ka dhigi karaan cuntooyinka kuwo aan la cuni karin, gaar ahaan haddii weelka ay ku jiraan uu wasakhoobo. **Ka takahlus** cuntooyinka hoos ku xusan haddii biyaha gaareen, ku firdhismeen, ku tifqeen ama dhex galaan weelka ama baakadka:

- Cuntooyinka, cuntooyinka badan ee meel iskula jira, khudradda fareeshka ah, hilibka, digaagga, kalluunka iyo ukunta ay soo gaareen biyaha daadka.
- Cunto kasta oo lasoo galiyay warqad, caag, maro ama faaybar.
- Kartoonada, xitaa haddii ay u muuqdaan kuwo qalalan, sida badarka, noocyada kala duwan ee baastada, bariiska iyo cusbada.
- Cuntooyinka lasoo galiyay kartoonka, sida maayonees, suugada ansalaatada ama fooylka ama bacada.
- Cuntooyinka ku jira dhalooyinka, xitaa haddii aan la furin laakiin daboolkoodu yahay warqad, fooyl, baca adag ama maro.
- Cabbitaannada, dareerayaasha iyo cuntooyinka ku jira dhalooyinka leh daboolkooda jag siiyo si loo furo ama weelasha daboolka laga fiiqo, kuwa birta lagu furo, ama kuwa daboolkooda la wareejiyo.

- Dhammaan baakadaha ama weelasha furan, iyo cuntooyinka bacaha ku jira.
- Gasacyada buusan, ay wax ka daadanayaan, bararsan ama miriray.
- Gasacyada ka fog meelihii lagu ogaa oo ay ku keedsanaayeen (halista dillaacyo ama daloolo yaryar).
- Gasacyada aan lahayn macluumaadkii sumada u ahaa ee ku qornaa oo saxda ah lama iibin karo. Sidaas daraadeed, waan in la tuuraa gasacyada macluumaadkii sumada u ahaa ee ku qornaa ay wax soo gaareen ama tirtirmeen.

Qiimeynta Guud ee Dib-u-helidda Waxyaalaha Daadku Saameeyay

- Cuntada la tuuray geey meel gooni ah oo ku ilaali meeshaas, kana fogee jikada ama meelaha cuntada lagu diyaariyo iyo qalabka, kuna kaydi weelal daboolan si looga hortago in loogu adeego dadweynaha ama wasakhow ay dhaliyaan si aan kam aheyn.
- Haddii cuntada loo baahan yahay in la hayo ilaa shirkada cuntada keenta ay lacag celin sameyso ama soo badesho badeecade xarunta, waa in si cad loogu calaamadeeyaa "iib ma ahan" lana dhigaa meel qaboojiye ah oo ka go'an cuntada kale ilaa lacag celinta la sameeyo ama lasoo bedelo.
- Cuntada qaboojiyaha ku jirta ee la tuuray waxaa diiwaan gelin kara shirkadda cuntada.
- Xarunta waa inay qortaa nooca iyo tirada cuntada, kharashaadka iyo sababta loo tuuray, si loogu isticmaalo caymiska iyo shuruudaha sharci.
- Cuntada yar ee la tuurayo waxaa lagu burburin karaa walax nadiifin (sida kiimikada wax lagu dhaqo) kadibna lagu ridi karaa weelka qashinka oo daboolan ee yaala xarunta banaankeeda.
- Cuntada badan waa in lagu kaydiyaa weelal qashin daboolan oo lagu ilaaliyaa meel kadibna sida ugu dhakhsaha badan u qaadaan shirkad qashinka qaada.
- Dhammaan qashinka cuntada waa in laga takhalusaa si waafaqsan shuruucda gobolka iyo kuwa deegaanka ee ku saabsan qashinka, lana geeyo goob qashin qub ah oo sharciyeysan.
- Goobaha qashin qubka deegaanka waa in lala xiriiraa ka hor inta aan loo geynin cunnada qashinka ah ee qof ama gaadiid gaar ah, si loo xaqiijiyo iney aqbalayaan.

WASAKHOWGA BADEECADA

Xaaladda qiimee:

- Qiimee baaxadda wasakhda.
- Qiimee hadii loo baahanyahay ila lala wadaago hay'adaha dawladda si ay wax uga qabtaan.
- Haddii looga shakiyo in cudur faafa leedahay cuntada, isla markiiba jooji iibinta cuntada laga yaabo inay wasakhaysan tahay oo wac 911 ama ogeysii Guddiga Caafimaadka Boston.
- Haddii lagu shakiyo in badeecada si kam ah loo waxyeelleeyay, la xiriir booliska oo ilaali wixii caddeyn ah ee suuragalka ah.

Qaad tallaabooyinkaan si aad u yareyso halista/faafitaanka:

- Jooji iibinta badeecada ama ka saar suuqa hadii aad u aragtaan inay habboon tahay.
- Qimee haddii loo baahan yahay in la ogeysiiyo dadweyne.
- Qiimee haddii ay daruuri tahay in badeecada suuqa laga saaro loona sheego macaamiishii gadatay iney joojiyaan isticmaalkooda soona celiyaan.
- Samee hab-raac ku saleysan sida loo maareyn doono ka saarista badeecada suuqa looguna sheegi lahaa dadka iibsaday iney soo celiyaan, haddii loo baahdo.
- Go'aan ka gaar sida looga takhalusaayo badeecada.

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadka baxay:

Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

QABOOJIYE AMA KULULEEYE HALAABAY/CUNTO XUMAATAY

Haddii qalabka qaboojiyeyaasha ama kululeeyayaasha ay halaabaan:

1. Isku day inaad ogaato sababta halaabida keentay.
2. U sheeg shaqaalaha aaggaas ku sugan.
3. Jooji iibinta badeecada ay waxyeelada soo gaartay.
4. Go'doomi ama xir aagagga ay saameynta soo gaartay.
5. Bilaaw habka la socoshada meesha uu maraayo heerkulka.
6. La xiriir shirkada kaala shaqeysa adeegaan.
7. Wac lambarada laga xiriiro shaqaalaha gurmadka haddii ay kuu saamaxayso.
8. Raac tallaabooyinka hoose ilaa heerkulka uu ku soo noqdo heer caadi ah.

Waxyaalaha ay tahay in aad sameyso haddii lasoo sheego digniin ah in korontada go'i doonto

Qaad tallaabo ay cuntada kusii kululaaneyso, tan qabowna ay qabow kusii ahaaneyso. Geey firinjeerka iyo qaboojiyaha heerka ugu qabow. Markii ay korontada go'do, waa in la qoraa waqtiga.

Waxyaalaha ay tahay in la sameeyo markii ay korontada go'do

Muhiimada waa in cuntada kulul lagu hayo in ka badan 135°F, cuntada qabowna in ay ka hooseyso 40°F (4°C) hadba intii wakhtiga ugu dheer suuraggalka ah, si joogto ahna loola socdo heerkulka si loo ogaado marka ay cuntadu noqoto mid cunisteeda ay waxyeelo keeneyso.

Cuntada kulul

- Ha gelin cunto kulul firinjeeradda ama qaboojiyayaasha.
- Isticmaal "gasaca shidaalka lagu kululeeyo" oo hoos loo dhigo cuntooyinka yaalla miisaska koronto leh si loo xaqiijiyo in heerkul ka uusan ka yaraan 135°F.

Cuntada qabow

- Ku dadaal in albaabbada firintijeeradda iyo qaboojiyeyaasha ay xirnaadaan markii wax laga saaraayo mooyee.
- Haddii ay suuragal tahay, isugu ururi xirmooyinka cuntooyinka qabow si loo yareeyo kulayl aan badneyn ugu soo gudbo.
- Dabool iska-faalooyinka cuntada qabow ee furan, gaar ahaan kuwa taagan.

Fiiro gaar ah: Isticmaalka barafka qalalan si loogu qaboojiyo cuntada wuxuu keeni karaa iney isku uruuraan kaarboon dhaay-ogsaydh (CO2) oo waxyeelo keeni karta.

Ha diyaarin ama ka karinin cunto haddii aadan awoodin:

- Inaad si fiican u dhaqid, u biyo raacisid, una nadiifiid alaabt cuntada.
- Inaad isticmaasho how-qaadayaasha jikada iyo hawo keenista (Uuro sun ah ayaa dhaawac

ama dhimasho keeni karta).

- Inaad si fiican u iftiimiso goobaha cuntada lagu diyaariyo ama lagu kariyo si loo xaqiijiyo in si wanaagsan loogu diyaariyo nadiifiyo iyo jeermiskana looga dilo cuntada.
- Inaad haysato biyo kulul ama biyo cadaadiskooda uu ku filanyahay karinta iyo diyaarinta cuntada.
- Inaad cuntada ku heyso heerkul ku filan.

Waxyaalaha ay tahay in la sameeyo markii ay korontada soo laabato

- Ogoow heerkulka gudaha ee cuntada oo dhan.
- Haddii ay suuragal tahay, kala saar xirmooyinka cuntada ee ku jira firintijeeradda iyo qaboojiyeyaasha si ay si dhaqso ah dib ugu qaboojiyaan.
- Ka takhalus cuntada khatarta leh ee laga yaabo inay ku jirtay heerkul aan ku fiicneyn oo ay ku halaawday.

Hubi haddii cuntada kulul ee laga yaabo iney khatar tahay wali la cuni karo oo aanay wax dhib ah ka imaaneynin

Cuntada kulul

- Haddii koronto la'aantu socoto 2 saacadood ama ka yar oo heerkulka cuntadu ka hooseeyo 135°F, waa la iibin karaa haddii lagu kululeeyo 165°F ka dibna lagu hayo 135°F ama ka badan, ama haddii si degdeg ah loogu qaboojiyo 41°F ama wax ka hooseeya 2 saacadood gudahood markii ay korontadu soo noqoto.
- Haddii ay korontadu maqanaato wax ka badan 2 saacadood, cuntada lama iibin karo.

Cuntada qabow

- Haddii ay korontadu maqanaato wax ka yar 2 saacadood oo cuntadu tahay 45°F ama ka qabow, waa la iibin karaa. Haddii heerkulka cuntada uu yahay 46°F ilaa 50°F, si degdeg ah u qabooji oo geey 41°F ama heer ka hooseeya 2 saac gudahooda.
- Haddii korontadu maqanaato 2 ilaa 4 saacadood, cuntada waa la iibin karaa haddii ay ka qabowdahay 45°F, laakiin waa in lagu qaboojiyaa 41°F ama heer ka hooseeya 2 saac gudahooda. Haddii heerkulka cuntada uu u dhaxeeyo 46°F ilaa 50°F, waa in si degdeg ah lagu qaboojiyaa oo la geeyaa 41°F ama heer ka hooseeya 1 saac gudahooda. Haddii heerkulkeeda uu ka sareeyo 50°F, lama iibin karo.
- Haddii korontadu maqanaato 4 saacadood ama ka badan, cuntada waa la iibin karaa haddii ay tahay 45°F ama ka qabowdahay oo lagu qaboojiyo 41°F ama heer ka hooseeya 1 saac gudahooda. Haddii heerkulkeeda uu ka sareeyo 45°F, lama iibin karo.

Ka Takhalusida Cuntada Halaawday

Haddii uu shaki kaa galo, tuur. Haddii la go'aamiyo in laga takhaluso cuntada, qor nooca iyo inta ay la'eg tahay cuntada iyo sababta loo tuurayo si loogu isticmaalo caymiska iyo shuruucda sharci. Cuntada yar ee la tuurayo

waxaa lagu burburin karaa walax nadiifin (sida kiimikada wax lagu dhaqo) kadibna lagu ridi karaa weelka qashinka bannaanka. Si looga takhaluso cuntada, la xiriir shirkadda qashinka kaa qaada ama maamulka qashinka deegaankaaga si aad u hesho tilmaamo ku saabsan ka takhalusida.

Dib-u-bilaabidda Hawlaha Caadiga ah

Shuruudaha soo socda waa in la xaqiijiyaa ka hor inta aan la bilaabin diyaarinta/karinta cuntada iyo/ama iibinta cuntada laga yaabo iney khatar yihiin:

- In laga takhaluso dhammaan cuntada laga yaabo iney khatar yihiin.
- In dib loo soo celiyo adeegyada korontada iyo gaaska.
- In dhammaan qalabka otamaatiga ah joojinta socodka korontada si saxda dib loogu shido, haddii loo baahdo.
- In dhammaan qalabka iyo xaruumaha si sax u shaqeynayaan, oo ay kamid yihiin: nalalka, firintijeeradda, kululeeyayaasha, hawo-qaadayaasha, musqulaha
- In biyaha kulul iyo kuwa qabow ee la cabi karo ay leeyihiin cadaadis ku filan: dhaqida gacmaha, si fiican loogu dhaqo alaabta

Haddii xaruuntiida ay xirto Waaxda Caafimaadka, waa inay xirnaataa ilaa aad ka hesho ogolaansho rasmi ah oo Waaxdu ku siiso inaad dib u furto.

WASAKHOWGA BIYAHA/AMARKA KARKARINTA BIYAHA ISTICMAALKA KAHOR

Haddii laguu soo wargaliyo in ay biyaha wasakh yihiin ama haddii waaxda biyaha ama maamulka deegaanka ay ku dhawaaqaan digniinta karkarinta biyaha:

Wac Maamulka Dukaanka oo la xiriir lambarada laga xiriiro shaqaalaha gurmadka haddii ay kuu saamaxayso.

Barafka, Cabitaanada, Sharaabka, Shaaha, Kafeega, iwm.

- Dami mashiinnada cabitaanada aashitada, kuwa barafka, kuwa biyaha caadiga, iyo kuwa biyaha buufiya.
- Burburi dhammaan barafka ku jira baaldiyada kaydka. Isticmaal barafka warshadaha ay sameeyeen oo keliya.
- Dami mashiinka kafeega, shaaha barafka, iyo meelaha biyaha laga cabo.

Diyaarinta & Karinta Cuntada

- Qashinka ku dar cuntada diyaarka ah ee lagu kariyay biyo ka hor inta aan la ogaan iney wasakheysanyihiin.
- Isticmaal qudrad horay loo dhaqay ama lagu dhaqay biyo la karkariyay ama biyaha caaga ah.
- Diyaari cuntooyinka diyaarka ah ee karsan adigoo isticmaalaya biyaha caaga ee warshadaysan ama biyo la karkariyay.
- Ku kari cuntada biyaha caaga ee nadiifka ah ama biyo laga keenay ceel dadweyne oo ay dowlada xaqiijisay iney nadiif yihiin.

Dhaqidda Gacmaha

- Isticmaal biyaha caaga ee nadiifka ah, biyo la karkariyay, ama biyo laga keenay ceel dadweyne oo ay dowlada xaqiijisay iney nadiif yihiin.
- Ama, isticmaal biyaha tubada kadibna isticmaal jeermis-dilaha gacmaha.
- Waa in la xirtaa galoofis inta aan la qaban ama la taaban cuntooyinka aan karinta u baahneyn ee diyaarsan.

Nadiifinta & Jeermis-dilista

- Isticmaal nidaamka jira. Xaqiiji in kiimikada jeermis-dilaha uu sax yahay.

Kadib Wasakhowga/Amarka Biyo Karkarinta:

- Qulqulsii ama biyo marsii biyaha tubada gacma dhaqa, tubooyinka biyaha laga cabo, mashiinada sharaabka iyo kuwa kafeega ugu yaraan 5 daqiido.
- Nadiifi oo jeermiska ka dil qalabka kafeega iyo sharaabka/cabitaanada adigoo raacaya tilmaamaha soo shirkada soo saartay qalabka.
- Haddii uu qalabka gudaha ku leeyahay shaandhooyin waa in la beddelaa.

<u>Mashiinnada Barafka</u>

- Biyo ku qulqulsii meesha ay maraan biyaha lagu shubo mashiinka barafka.
- Xir bahasha kontoroosha biyaha ee meesha ay maraan biyaha lagu shubo mashiinka barafka korkiis, oo ka fuji bahasha biyo mareenka ah mashiinka.
- Dib ugu xir bahasha biyo mareenka ah mashiinka.
- Fur biyaha adigoo isticmaalaya meesha laga furo.
- Biyo ku qulqulsii tubada ay maraan biyaha ee gudaha mishiinka.
- Samee baraf muddo saacad ah ka dibna iska tuur barafkaas.

DHACA

Habraacyada:

1. Haddii aad aragto meel uu ka socdo fal-dambiyeedka, uga dhaqaaji meel ammaan ah. Ha isku dayin inaad daba gasho tuugga/dhacaha. Haddii aad awoodo, ka caawi dadka baahiyaha gaar ah qaba iyo kuwa nugul sidii ay iyagana ku tagi lahaayeen meel ammaan ah.
2. Wac nambarka gaaban ee 911.
3. Hadii aanay wax dhib ah kaaga imaaneynin, qor sifooyinka tuugga ama dhacaha, gaariga uu ku baxsaday, iyo lambarka taarikada gaariga.
4. Wac lambarada laga xiriiro shaqaalaha gurmadka haddii ay kuu saamaxayso.
5. Qor, sawirro ka qaad ama muuqaal ka duub dhacdada oo warbixin u gudbi booliiska.

Waxba haka badalin oo ha taaban wax yaala goobta dambiga uu ka dhacay:

Xaqiiji in la ilaayo goobta oo la xiro si qofna uusan u gelin goobta dambiga ama aagga ku xeeran.

KACDOON BULSHO/SHACAB

Xir xarunta haddii ay kugu amraan maamulka Degmada/Gobolka/Shirkadda/Laamaha Amniga/Hay'adaha dowliga ah:

1. Ka saar ama u sheeg dammaan shaqaalaha iyo dadka kale ee meesha jooga ee aan loo baahneyn iney joogaan si ay kaaga caawiyaan xiritaanka xarunta. Eeg Qorshaha Bixitaanka ee kore.
2. Ilaali lacagta iyo badeecada.
3. Xir dukaanka ama xarunta.

Ilaali lacagta/badeecada haddii aysan khatar galinaynin qof naftiisa:

3. Xir oo quful dhammaan mashiinnada lacagta/kuwa kaashka.
4. Quful sanduuqa/xafiiska lacagta kaashka iyo albaabada xafiiska lacagta kaashka/kontoroolka.

Tallaabooyinka la qaadaayo si loo badbaadiyo dukaanka xiliyada rabshadaha bulshada:

1. Daar dhammaan nalalka baarkinka oo dami dhammaan nalalka gudaha. Haddii ay jiraan kaamirooyin, xaqiiji in ay wax duubayaan.
2. Raac habraacyada alwaaxyada/biraha loogu dhajinaayo daaqadaha iyo albaabada hadii la idin faro.
3. Xiro oo quful dhammaan meelaha laga soo galo dhismaha:
   a. Albaabada dabka
   b. Duleeladda saqafka
   c. Albaabada hoos loo jiido
4. So uruuri dhammaan qalabka dab-damiyayaasha oo dhig albaab walba agtiisa.
5. Ogoow meelaha ay yaalaan tooshashka oo geli batariyayaal cusub.
6. Daar dhammaan alaarmiyada dukaanka/xaruunta.
7. Xaqiiji in dhammaan qalabka xakameeya biyo rusheeyayaasha ay ku xiran yihiin booska "fur".
8. Ka qaad alwaaxa kartoomada waraaqaha iyo waxyaabaha ololi kara ee yaala meelaha u dhow bannaanka dukaanka/xarunta.

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadyada baxay:

Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.

WEERARADA INTARNEETKA (SAYBAR-ATAAK)

Haddii laga shakiyo inuu jiro weerar dhanka intarneetka ah ama la xaqiijiyo:

Waa in shaqaale uu la socdaa dhaqdhaqaaqa siistamka oo uu isla markiiba soo gudbiyaa hadii ay jiraan dhaqdhaqaaqyo aan horay loo baran siistamka.

Habraacyada:

1. Fiiri hadii ay jiraan dhaqdhaqaaq aan horay loogu arag siistamka (tusaale, lacag bixinno ama diidmooyin kiridhit kaar, akoono aan caadi ahayn oo ku jira warbixinnada kiridhitka, qoraallo baraha bulshada ah oo aan idinka soo dhigin, iimayllo dadka usoo dhacaya oo aan idinka usoo dirin, iwm.)
2. Ka xir aaladaha uu saameeyay weerarka shabakadda intarneetka si loo xakameeyo khatarta.
3. Abdheet garee sekuuritiga softuweerkaaga, iskaangaree oo nadiifi aaladaada, ama dami oo u geey xirfadle ku fiican howlahaas.
4. Isla markiiba la socodsii qolyaha IT-ga/sekuuritiga ama shirkadda kaala shaqeysa siistamyada IT-ga, intarneetka iyo secuuritigooda.
5. Qor ama sawirro ka qaad caddeymaha weerarka intarneetka (tusaale, fariimaha erorka, waqtiyada dhacdooyinka, siistamyada ay saameynta soo gaartay).

Heerarka Khatarta Weerarada Intarneetka:

- **Dhaqdhaqaaq Laga Shakiyay:** Isku dayo gelitaan siistamka oo aan caadiyan dhicin, gelitaan siistamka ah aan la fasaxin, ama hoos u dhac ku yimaada siistamka. La wadaag qolada IT-ga oo si dhow haloola socdo.
- **Weerar intarneet oo la xaqiijiyay:** Weerar maalweer ah oo la xaqiijiyay, dalbashada lacag madaxfurasho, xatooyo xogeed, ama siistam waxyeello ay soo gaartay. Isla markiiba ka xir aaladaha uu saameeyay weerarka shabakadda intarneetka oo bilow habraacyada ka fal-celinta.
- **Siistamka oo halaabay ama hawada ka baxay:** SIistamkii oo shaqeyn waaya ama aad xakameyn weyso siistamyada muhiimka ah. Bilow habraacyada ka fal-celinta dhacdada iyo qorshaha kasoo kabashada musiibada.

Haddii weerar dhanka intarneetka ah uu ka dhex dhaco gudaha shirkada/hay'adda:

1. Xaddid gelitaanka siistamyada muhiimka ah si looga hortago iney ku faafaan kuwo dheeri ah.
2. Bedel dhammaan nambarada sireedyada ah oo furo qaababka xaqiijinta xogta soo galitaan siistemka (MFA) haddii uusan horay u furneyn.
3. Ogoow haddii xogta xasaasiga ah la jabsaday oo qiimee waajibaadka sharci ee iman kara.
4. Raac shuruudaha ka warbixinta sharciyeed ee dhacdada haddii ay khuseeyaan sharciyada xatooyada xogta.
5. Isla markiiba meel kale ku shub xogta muhiimka ah haddii ay weli suuragal tahay.
6. Kaydi nuqullada offline-ka ah ee faylasha muhiimka ah ah.

Kasoo kabashada: Haddii xog la jabsado ama siistamka ay dhibaato soo gaarto:

1. La shaqee khubarrada sekuuritiga intarneetka si ay uga baabi'iyaan khataraha oo ay siduu ahaa dib ugu soo celiyaan siistamka.
2. La xiriir laamaha amniga haddii xatooyo xogeed ama khiyaano maaliyadeed ay la xiriirta arrinta.
3. Ogeysii shaqaalaha, macaamiisha, ama dad kale ee ay saameysay arrinta hadii sharciga uu kugu waajibinaayo.

Nadiifinta siistamyada iyo Ka-hortagga Dhacdooyinkaan oo Kale Mustaqbalka:

- Dib-u-eegis dhamaystiran ku samee siistamyadaada si aad u ogaato meelaha ay ka nugul yihiin.
- Hirgeli tallaabooyin sekuuritiga lagu adkeynaayo (tusaale, firewalls-ka, difaaca kombuyuutarrada, u tababaridda shaqaalaha).
- La soco dhaqdhaqaaq walba oo laga shakiyo kadib dhacdada.
- Wax ka beddel qorshaha ka fal-celinta dhacdooyinkaan oo kale iyadoo lagu dabaqaayo casharradii laga bartay kuwii dhacay.

Si aad u hesho tilmaamo iyo qalab dheeri ah, booqo:

- StopThinkConnect.org
- Ready.gov/cybersecurity
- Boston.gov/cybersecurity
- Cisa.gov/audiences/small-and-medium-businesses
- Ururka Caalamiga ah Saaybarka: Buug Hage ah oo loogu talagalay Ganacsiyada Yaryar

Warbixin ka qor dhammaan Dhacdooyinka / Kharashaadka baxay:

Ha iloobin inaad warbixin ka qorto isla markaana aad diiwaanka ku darto dhammaan dhacdooyinka/kharashaadka ku baxay adegga gurmadka la ajligiisa.